



SO

# *Faraha la iska qaado iyo eurodac*

Wabrixinta muwaadiniinta wadan sadexaad ama dadka aan waddan lahayn ee lagu helo inay si sharci darro ah ku joojeen waddan xubnaha ka mid ah, sida uu qabo qodabka 29(3) ee xeerka (eu) no 603/2013

Haddii lagugu helo inaad sharci darro ku joogitd wadan , ‘Dublin katirsan’<sup>1)</sup>, maamuladu waxay qaadi karaan farahaaga waxayna u gudbinayaan kaydka xogta ee la dhaho “Eurodac”. Ujeedada tan looga danleeyahay waxay tahay oo kaliya in la arko inaad horey magangalyo u dalbatay iyo inkale. Xogta farahaaga laguma kaydin doono kaydka xogta Eurodac, laakiin haddii aad horey magangalyo uga dalbatay wadan kale, waxaa dib laguugu diri karaa wadankaas.

Haddii farahaagu ay si cad u muuqan waayaan, oo ay ku jirto inaad si kas ah farahaaga dhaawac u gaarsiisay si aysan usoo bixin, mustaqbalka ayaa faraha lagaa qaadi doonaa.

Eurodac waxaa ku shaqeeya Haayadda Midowga Yurub ee la dhaho eu-LISA. Xogtaada waxaa kali ah oo loo siticmaali karaa ujeedooyinka uu sharcigu qeexay. Waxaa xogtaada heli kara oo kaliya Sistamka Dhexe ee Eurodac. Haddii aad mustaqbalka magangalyo ka codsato wadan kale oo Dublin katirsan, faraha lagaa qaado waxaa sidoo kale loo gudbin doonaa Eurodac. Xogta lagu kaydiyo Eurodac lalama wadaagi doono wadan kale ama urur ka baxsan EU iyo wadamada la xiriira.

---

1) Waxay ku durugsantaaydhaamaan Midowga Yurub Ayrlandi (IE), Biljam (BE), Bolaandi (PL), Bulgeriya (BG), Danmarki (DK), Faransa (FR), Fiilaan (FI), Giriig (EL), Hangari (HU), Isbayn (ES), Isloofaakiya (SK), Isloofeeniya (SI), Istooniya (EE), Iswiidhan (SE), Jarnani (DE), Jeeg Ribablik (CZ), Karooshiya (HR), Khubras (CY), Laadfiya (LV), Laxanbargi (LX), Litu’aaniya (LT), Malta (MT), Nedarlandi (NL), Ostariya (AT), Purtaqiis (PT), Roomaaniya (RO), Talyaani (IT), Yunaytidh Kiingidhoom (UK), iyo sidoo kale 4ta wadan ee la « xiriirta » Xeerka Dublin Noorwey (NO), Ayslaandhi (IS), Iswiisarlaandhi (CH), iyo Lijtenistiin (LI)

©Midowga Yurub 2014

Dib usoosaaridda waa la ogalyahay. Wixii isticmaalid ah ama dib usoo saarid sawirada shakhsiga ah, waa in ogalaansho laga dalbadaa cidda tooska u leh xuquuqda daabacaadda.

## Warbixinta xiriirada

### Aqoonsiga Hayaha Eurodac iyo wakiilkiisa/keeda

Baraha lala xidhiidhayo: Guddida Bilayska Qaranka (Poliisihallitus) iyo Adeegga Socdaalka Fiinland (Maahanmuuttovirasto)

### Tafaasiisha la-xidhiidhka xafiiska hayaha

+ 358 295 480 181  
Poliisihallitus (Guddida Bilayska Qaranka)  
PL 22, 00521 Helsinki  
kirjaamo.poliisihallitus@poliisi.fi

Maahanmuuttovirasto (Adeegga Socdaalka Fiinland)  
PL 18, 00581 Helsinki  
+358 295 419 600  
Lambarka adeegga arrinkan:  
+358 295 419 627,  
Salaasa-Khamees 10-11  
www.migri.fi

**Haddii maamuladayada ay la noqoto in laga yaabo inaad wadan kale ka dalbatay magangalyo caalami ah kaasoo masuul ka noqon karay baadhista dalbashadaada, waxaad heli doontaa warbixin faahfaahsan oo ku saabsan nidaamka la raaci doono iyo sida ay u saamaynayso adiga iyo xuquuqahaaga.**

### Tafaasiisha La-xidhiidhka Hay'adda Kormeerka Qaranka (Ilaalinta Xogta)

TietosuojaValtuutetun toimisto (Xafiiska Baadhaha Ilaalinta Xogta)  
PL 800, 00521 Helsinki  
+ 358 295 666 700  
Adeegga macluumaadka:  
+358 295 616 670,  
Isniin-Khamees 9-11 iyo 13-15,  
Jimce 9-12  
tietosuoja@om.fi  
www.tietosuoja.fi



SO

*"Waxaan ku jiraa nidmaaka dublin - maxaa loola jeedaa?"*

B

Nidaamka dublin- warbixinta codsadayaasha magangalyada caalamiga sida uu qabo qodabka 4 ee xeerka (eu) Lambarkisu yahay 604/2013



Rajavartiolaitos  
Gränsbevakningsväsendet  
The Finnish Border Guard